# Consultative Meeting of the Somali Signatories of the Process for Ending the Transition

Addis Ababa, May 23, 2012: the Somali signatories of the process for ending the transition held a consultative meeting in The African Union Headquarters, from May 21 to May 23, 2012.

The meeting was hosted by the African Union and facilitated by the Office of the UN Special Representative for Somalia (UNPOS).

The meeting was attended by the signatories of the process for ending the transition, including HE Sheikh Sharif Sheikh Ahmed, President of the Transitional Federal Government (TFG); HE Sharif Hassan Sheikh Aden, Speaker of the Transitional Federal Parliament (TFP), HE Dr. Abdiweli Mohamed Ali, Prime Minister of TFG; HE Abdirahman Mohamed Mohamud (Farole), President of Puntland State; HE Mohamed Ahmed Aalim President of Galmudug State; Khaliif Abdulkadir Moallim Noor, Representative of Ahlu Sunnah Wal-Jama'a (ASWJ) and the UN Special Representative for Somalia (SRSG) Amb. Augustine Mahiga.

The Signatories of the Roadmap have today received final draft copies of the Draft Constitution which was subjected to a constitutional review by a technical committee. They harmonized and incorporated the written submissions of the signatories into the final Draft Constitution

Considering the current political situation in Somalia as well as the need to urgently and fully implement the Roadmap to End the Transition based on the principles agreed upon in the Garowe I and II and Galka'yo consultations, the Somali signatories discussed at length the modalities of implementing the above- mentioned principles and agreements.

The Signatories took into account that the Transitional Federal Parliament in its current state is unable to pass the required amendments to the Transitional Federal Charter and necessary legislation to end the transition and enact the subsequent legislation required to allow the constitutional process to proceed. This comes at a time when the final preparations to table the Draft Constitution for provisional adoption are underway and the transition end date is three months away-20 August 2012.

Consequently, the Signatories of the process for ending the transition resolved to advance the process in consultation with the recognized Somali Traditional Leaders (Duubab), in accordance with Somali customary law, and have agreed:

1. To recommend that the President of the TFG provide, through a presidential decree, a legal basis to steer the constitutional process towards the adoption stage and to end the transition.

2. To consequently convene a National Constituent Assembly as soon as is practicable, pursuant to Article 1 (g) of the Garowe I Principles. The signatories have agreed that the selection of National Constituent Assembly (NCA) delegates shall be finalized no later than 20th of June 2012 and the New Federal Parliament (NFP) members no later than 15th of July 2012.

3. To facilitate the implementation of the Garowe I and II, and Galka'yo agreements and the clauses above, by adopting:

    a. A Protocol Establishing the Constituent Assembly an d the New Federal Parliament.
    b. A Protocol Establishing the Technical Selection Committee (TSC)
    c.
    d. A Protocol Authorizing the Finalization of the Provisional Constitution with the Incorporation of the Harmonized Submissions of the Signatories to constitute the final draft for presentation to the National Constituent Assembly (NCA)

4. That the TSC will assist the recognized Traditional Leaders (Duubab) to ensure that the nominees of the NCA and NFP comply with the criteria set out in Garowe II. The TSC will support the NCA in management and dispute resolution. It is agreed to amend Article 5 of the Galkayo Agreement 26 March 2012, to revise the size and composition of the TSC. It is hereby agreed that the TSC will be made up of 27 Somali members, 2 members from UNPOS and 7 International Observers. The Somali members shall be selected by the Somali signatories on the basis of the 4.5 formula.

5. To amend Article 3 (e)(i) of the Garowe II Principles of 17 February 2012, regarding the nomination process for New Federal Parliament. The Traditional Leaders shall be required to nominate one candidate for every seat instead of two. This is reflected in the Protocol Establishing the Constituent Assembly.

6. To establish an Arbitration Board of the Traditional Leaders (Duubab) no later than 26th of May 2012 to resolve any disputes that may occur regarding the validation of the Traditional Elders. The Arbitration Board will consist of 25 Traditional Leaders, 5 from each Clan to resolve any issues or disputes arising from their respective Clans.

7. To recognize that the continuing responsibility for completing the process of ending the transition and implementing the principles of Garowe I & II and Galka'yo lies specifically with the signatories of the process for ending the transition.

8. To establish a RoadMap Signatories Coordination Office in Mogadishu to ensure effective communication and information sharing.

9. Bearing in mind that the process to end the Transition shall end on 20 August 2012, the signatories agree to the following updated timelines in order to give direction to all stakeholders.

| | |
|---|---|
| 26th May 2012 | Arbitration Board of the Traditional Leaders established |
| 1st Jun 2012 | Technical Selection Committee (TSC) established |
| 20th Jun 2012- | TSC publishes the finalized (and fully vetted) list of NCA delegates.30th Jun 2012 Selected NCA members to be present in Mogadishu; Copies of draft constitution to be received by the NCA delegates |
| 2nd Jul 2012 | NCA convened - Opening ceremony |
| 10th Jul 2012 | Provisional Constitution adopted |
| 15th Jul 2012 | TSC publishes finalized and fully vetted list of New Federal Parliament (NFP) |
| 20th Jul 2012 | New Federal Parliament members sworn in |
| 4th Aug 2012 | Election of Speaker and Deputy Speakers by NFP |
| 20th Aug 2012 | Election of President by the NFP |

10. To recommend that the President approves the National Security and Stabilization Plan 2011 – 2014 (NSSP) through a presidential decree, mindful of the urgency to institute a wholly Somali owned national security sector and given the fact that the current Parliament is unable to table a motion on this matter.

11. To urge the TFG and the International Community to lend support to Puntland and Galmudug and ASWJ-controlled areas with respect to the urgent security needs of these regions stemming from the Al Shabbab's spillover northwards up to the Golis Mountains and piracy.

12. To urge the international community to provide in a timely manner, political good offices, facilitation and financial support for the process to end the transition and to that end, lift the arms embargo as appropriate.

13. To emphasize that no delay or obstruction will be accepted by the Somali people or the International Community, and spoilers will be identified and named, and appropriate joint action by Somali and International stakeholders will be taken against them.

14.To encourage regional states and organizations –AU, IGAD, League of Arab States and OIC, to continue providing s upport for this process.

15.To thank the wider International Community and the UN agencies, UNPOS in particular, for their on-going support

16.Anything that is not clear in this agreement or the Protocols incorporated by reference herein shall be interpreted and applied in accordance with the Roadmap and the Garowe I & II Principles, and the Galka'yo Agreement.

Signatories

1. Transitional Federal Government of Somalia
   President of the Transitional Federal Government
   HE Sheikh Sharif Sheikh Ahmed

   ______________________________

2. Transitional Federal Parliament of Somalia
   Speaker of the Transitional Federal Parliament
   Hon. Sharif Hassan Sheikh Aden

   ______________________________

3. Transitional Federal Government of Somalia
   Prime Minister of the Transitional Federal Government
   Hon. Dr. Abdiweli Mohamed Ali

   ______________________________

4. Puntland
   President of Puntland
   Hon. Dr. Abdirahman Sheikh Mohamed Mohamud

   ______________________________

5. Galmudug
   President of Galmudug
   Hon. Mohamed Ahmed Alin

   ______________________________

6. Ahlu-Sunna Wal Jamaaca
   Representative of Ahlu Sunnah Wal-Jama'a (ASWJ)
   Khaliif Abdulkadir Moallim Noor

   ______________________________

7. Special Representative of the
   Secretary General of the UN for Somalia
   Ambassador Dr. Augustine Mahiga

   ______________________________

**Kulanka Wadatashiga Saxiixayaasha Soomaaliyeed ee Hanaanka Lagu Dhammeynayo Xilliga Kumeelguurka**

Qabyo-qoraal laga fiirsanayo

Addis Ababa, 23 May 2012: Saxiixayaasha Soomaaliyeed ee hanaanka dhammeynta xilliga kumeelguurka ayaa kulan wadatashi ah ku qabteen Xarunta Midowga Afrika, laga billaabo 21kii ilaa iyo 23kii bisha May 2012.

Kulanka waxaa martigeliyay Midowga Afrika waxaana fududeeyay Xafiiska Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya (UNPOS).

Kulanka waxaa ka soo qaybgalay saxiixayaasha hanaanka lagu dhammeynayo xilliga kumeelguurka, oo ay ka midyihiin: Madaxweynaha Dowladda Federaalka KMG, Md. Sheekh Shariif Sheekh Axmed; Guddoomiyaha Baarlamaanka Federaalka KMG, Md. Shariif Xasan Sheekh Aadan; Ra'iisal Wasaaraha Dowladda Federaalka KMG, Md. Dr. Cabdiweli Maxamed Cali; Madaxweynaha Dowladda Puntland, Md. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud (Faroole); Madaxweynaha Dowladda Galmudug, Md. Maxamed Axmed Caalin; Wakiilka Ahlu Sunna Wal Jamaaca, Md. Cabdulqaadir Macallin Nuur iyo Ergeyga Gaarka ah ee Qaramada Midoobay u Qaabilsan Soomaaliya, Danjire Augustine Mahiga.

Saxiixayaasha Qorshe Hawleedka ayaa maanta helay nuqulkii ugu dambeeyay ee qabyo-qoraalka dastuurka kaasoo uu dibueegid ku sameeyay guudi farsamo. Guddigu wuxuu iswaafajiyay talo soo jeedimadii qoraalka ahaa ee ay saxiixayaashu soo gudbiyeen, wuxuuna ku daray qabyo-qoraalka dastuurka.

Iyadoo la tixgelinayo xaaladda siyaasadeed ee hadda ka jirta Soomaaliya iyo baahida degdegga ah ee loo qabo in si buuxda loo hirgeliyo Qorshe Hawleedka oo ku saleysan mabaadi'dii lagu heshiiyay Shirkii Garoowe 1aad iyo Garoowe 2aad iyo wadatashigii Gaalkacyo, saxiixayaasha Soomaaliyeed waxay si qotodheer uga hadleen habkii lagu hirgelin lahaa mabaadi'da iyo heshiisyada kor ku xusan.

Saxiixayaashu waxay tixgeliyeen in Baarlamaanka Federaalka KMG, xaaladda uu hadda ku suganyahay, uusan kari karin inuu ansaxiyo wax ka beddelka la doonayo in lagu sameeyo Axdiga Federaalka KMG iyo inuu soo saaro shuruucda kale ee la doonayo in lagu dhammeeyo xilliga kalaguurka iyo shuruucda xigta ee loo baahanyahay in lagu hormariyo geeddi socodka dastuurka. Arrintan waxay ku soo beegantay waqti uu socdo u diyaargarowgii ugu dambeeyay ee lagu soo gudbin lahaa Qabyo-qoraalka Dastuurka si loogu sameeyo ansaxin ku meelgaar ah iyadoo saddex bilood oo keliya ay hartay dhammaadka xilliga ku meelgaarka – 20 Agoosto 2012.

Sidaas darteed, saxiixayaasha hanaanka lagu dhammeynayo xilliga ku meelgaarka waxay ku heshiiyeen inay horumariyaan geeddi socodka iyagoo la tashanaya odeydhaqameedyada (Duubabka) Soomaaliyeed ee la aqoonsanyahay, taasoo waafaqsan xeer dhaqameedka Soomaaliyeed, waxayna isku afgarteen:

1. inay talo ugu jeediyaan Madaxweynaha Dowladda Federaalka KMG inuu adeegsado dikreeto madaxweyne oo noqonaysa asaas horey loogu marinayo

arrimaha dastuurka laguna ansaxiyo dastuurka laguna dhammeeyo ku meelgaarka.

2. si loo qabto Golaha Dastuurka Qaran sida ugu dhaqsiha badan ee suurtagal ah, iyadoo loo cuskanayo Qodobka 1aad (G) ee Mabaadi'dii Shirkii Garoowe 1aad. Saxiixayaashu waxay isku raaceen in soo xulidda ergada Golaha Dastuurka Qaran la soo dhammeystiro ugu dambeyn 20ka bisha June 2012, sidoo kalena soo xulidda xubnaha Baarlamaanka cusub lasoo dhammeystiro ugu dambeyn 15ka bisha July 2012.

3. si loo fududeeyo hirgelinta Heshiiskii Shirkii Garoowe 1aad, kii Garoowe 2aad iyo kii Gaalkacyobba, waxaay la soo saarayaa:

a. Heshiis gaar ah oo lagu dhisayo Golaha Dastuurka iyo Baarlamaanka Federaalka cusub.
b. Heshiis gaar ah oo lagu sameynayo Guddiga Farsamo ee Xulidda (TSC)
c. Heshiis gaar ah oo lagu ogolaanayo in la soo dhammeystiro dastuurka ku meelgaarka iyadoo lagu darayo talooyinkii ay saxiixayaashu soo jeediyeen si uu u noqdo qabyo-qoraalka kama dambeysta ah ee loo gudbiyo Golaha Dastuurka Qaran

4. in Guddiga Farsamo ee Xulidda uu ka kaalmeyn doono odeydhaqameedya iyo duubabka la aqoonsanyahay xaqiijinta in dadka loo soo magacaabayo Golaha Dastuurka Qaran iyo Baarlamaanka Federaalka Qaran ay waafaqsanyihiin shuruuddii lagu soo dejiyay Shirkii Garoowe 2aad. Guddiga Farsamo ee Xuliddu Golaha Dastuurka Qaran ka taageerayaa maareynta iyo xallinta muranka. Waxaa lagu heshiiyay in wax laga bedelo Qodobka 5aad ee Heshiiskii Gaalkacyo ee 26kii Maarso 2012 iyadoo dibueedig lagu sameeyay tirada xubnaha uu ka koobanyahay Guddiga Farsamo ee Xulidda. Sidaa darteed, waxaa lagu heshiiyay in xubnaha Guddiga Farsamo ee Xulidda ay ka koobnaadaan 27 xubnood oo Soomaali ah, 2 xubnood oo ka socda UNPOS iyo 7 goobjoogayaal caalami ah. Xubnaha Soomaaliyeed waxaa soo xuliya saxiixayaasha Soomaaliyeed iyagoo adeegsanaya habka awood qaybsiga 4.5.

5. in isbedel lagu sameeyo Qodobka 3aad (e) (i) ee Mabaadi'dii Shirkii Garoowe 2aad ee 17kii Febraayo 2012 kuna saabsanaa magacaabidda xubnaha Baarlamaanka Federaalka cusub. Odeydhaqameedyada waxaa laga doonayaa inay kursigiiba u soo xulaan hal musharax intay laba soo gudbin lahaayeen. Arrintan waxay ku caddahay heshiiska lagu dhisayo Golaha Dastuurka Qaran.

6. in la sameeyo Golaha Dhexdhexaadinta Odeydhaqameedyada (Duubabka) ugu dambeyn 26ka May 2012, si uu u xalliyo wixii khilaafaad ah ee ka dhasha ansaxnimada odeydhaqameedyada. Golaha Dhexdhexaadintu wuxuu ka koobnaan doonaa 25 odey, oo qabiilkiiba ay 5 ka imanayso si ay u xalliyaan wixii arrimo ah ama khilaafaad ah ee ka dhex dhasha isla qabiilkooda.

7. in la aqoonsado in sii wadidda mas'uuliyadda dhammeystirka geeddi socodka dhammeynta xilliga ku meelgaarka iyo hirgelinta mabaadi'da Shirkii Garoowe 1aad iyo kii 2aad iyo kii Gaalkacyo ay si gaar ah u leeyihiin saxiixayaasha geeddi socodka dhammeynta xilliga ku meelgaarka.

8. in magaalada Muqdisho laga furo Xafiiska Iskuxirka Hawlaha Saxiixayaasha Qorshe Hawleedka si loo xaqiijiyo in xogta si dhab ah la isu la wadaago.

9. iyadoo maanka lagu hayo in xilliga ku meelgaarka uu ku egyahay 20 Agoosto 2012, saxiixayaashu waxay ku heshiiyeen qorshe waqtiyaysan si loo hago dhammaan dadka ay arrintu khuseyso:

| | |
|---|---|
| 26ka May 2012: | in la sameeyo Golaha Dhexdhexaadinta Odeydhaqameedyada |
| 1da June 2012: | in la dhiso Guddiga Farsamo ee Xulidda |
| 20ka June 2012: | in Guddiga Farsamo ee Xulidda uu faafiyo liiska kama dambeyska ah ee la xaqiijiyay ee ergada Golaha Dastuurka Qaran. 30ka June 2012 xubnaha Golaha Dastuurka Qaran ee la soo xulay waa inay wada joogaan magaalada Muqdisho; ergada Golaha Dastuurka Qaran waa inay helaan nuqullada qabyo-qoraalka dastuurka |
| 2da July 2012: | ergada Golaha Dastuurka Qaran waa inay qabtaan xafladdii furitaankooda |
| 10 July 2012: | waa in la ansaxiyo dastuurka ku meelgaarka |
| 15ka July 2012: | Guddiga Farsamo ee Xulidda waa inuu faafiyo liiska kama dambeysta ah ee la soo xulay ee xubnaha Baarlamaan Federaalka cusub |
| 20 July 2012: | waa in la dhaariyo xubnaha Baarlamaan Federaalka cusub |
| 4ta August 2012: | waa in Baarlamaanka Federaalka cusub uu doortaa Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo ku xigeenadiisa |
| 20ka August 2012: | waan in Baarlamaanka Federaalka cusub uu doorto Madaxweynaha |

10. in loo jeediyo Madaxweynaha inuu dikreeto madaxweyne ku ansaxiyo Qorshaha Amniga iyo Xasilinta Qaran ee 2011-2014 (NSSP), iyadoo maanka lagu hayo inay lagama maarmaan tahay in la sameeyo hay'ad amni qaran oo ay Soomaaliya leedahay, maadaama Baarlamaanka hadda jira uusan karin inuu ka doodo mooshin khuseeya arrintan.

11. in lagu guubaabiyo Dowladda Federaalka KMG iyo bulshada caalamkaba inay taageero siiyaan Puntland, Galmudug iyo goobaha ay gacanta ku hayso Ahlu Sunna Wal Jamaaca, iyadoo la tixgelinayo baahida amni ee degdegga ah ee ka jirta gobolladaas, taasoo ka imansaysa kooxda Al-Shabaab iyo burcad badeedda oo ku faafaya dhanka waqooyi ilaa iyo Buuraha Golis.

12. waxaa loogu baaqayaa bulshada caalamka inay bixiso kaalmo waqtiga ku haboon, dhexdhexaadin siyaasadeed, fududeynta iyo bixinta taageero maaliyadeed ee lagu bixiyo geeddi socodka si loo dhammeeyo xilliga ku meelgaarka, dalkana laga qaado cunaqabateynta hubka saran, hadba sida ku habboon.

13. in xoogga la saaro inaan dadka Soomaaliyeed ama bulshada caalamku ogolaanin wax dib u dhac ah ama caqabad ah, sidoo kalena la tilmaamo lana magacaabo qaswadeyaasha, kadibna Soomaalida iyo bulshada caalamka ee ay arrintu khuseyso ka qaadaan tallaabo midaysan.

14. in dowladaha iyo ururrada gobolka – Midowga Afrika, IGAD, Jaamacadda Carabta iyo Ururka Iskaashiga Caalamka Islaamka – lagu dhiirigeliyo inay sii wadaan taageerada ay ku bixinayaan geeddi socodka.

15. in bulshada caalamka oo dhan iyo hay'adaha Qaramada Midoobay, gaar ahaan UNPOS, loogu mahadceliyo taageerada sii socota ee ay bixinayaan.

16. Wax alla wixii aan ku caddeyn heshiiskan ama heshiisyada gaarka ah (borotakoollada) ee halkan ku lifaaqan waxaa loo fasirayaa looguna dhaqmayaa sida waafaqsan Qorshe Hawleedka (Roadmap) iyo Mabaadi'da Shirkii Garoowe 1aad, kii Garoowe 2aad iyo Heshiiskii Gaalkacyo.